


Buuxi diiwaangelinta Elektaroonswiga ah (eCheck):

Ilaa toddoba maalmood ka hor booqashadaada ama maalinta aad booqanayso, waxaad iska diiwaan gelin kartaa ballantaada onlaynka ah.

1. Iimayl iyo/ama qoraal ayaa lagaaga soo diray Children's Mercy. Guji lifaaqa. Haddii aan la heli karin, booqo MyChart oo dooro "Raadi eCheck."



2. Geli taariikhda dhalashada bukaanka oo guji "Xaqiiji"




3. Buuxi eCheck In adigoo gelinaya macluumaadka qayb kasta.

- o Halka aad joogi doonto inta lagu jiro booqashada muuqaalka ah
- o Macluumaadka caymiska iyo lacag bixinta
- o Daawooyinka uu bukaanku qaato
- o Farmashiyaha aad isticmaasho
- o Xasaasiyadda uu bukaanku qabo
- o Dhibaato kasta oo caafimaad oo uu qabo bukaanku
- o Su'aalaha safarka
- o Su'aalo kasta oo uu dhakhtarku u baahan yahay

4. Tijaabi makarafoonkaaga, kaaamiradaada, sameecadaha iyo khadka.


- o Joog meesha aad ku isticmaali doonto qalabkaaga inta aad ku jirto booqashadaada muuqaalka ah.
- o Guji "Tijaabi Qalabka (Test hardware)."



- o U ogolow kaamiradaada iyo makarafoonkaaga in la isticmaalo haddii lagu weydiyo.
- o Isticmaal liiska hoos loo dejijo si aad u badesho kaamiradaada ama makarafoonkaaga haddii loo baahdo.
- o Raadi calaamado cagaaran oo muujinaya in tijaabooyinku shaqeeyeen. 

5. Guji X si aad uga baxdo tijaabada qalabka marka la dhammeeyo.

6. Guji "Gudbi (Submit)" ee ku yaala eCheck In ka dib markaad dhammaystirto tallaabo kasta.




7. Dib u eeg faahfaahinta ballanta ka hor booqashadaada muuqaalka ah.


Ku martiqaad dadka kale Booqadhadaada Muuqaalka:

Lifaaqa aad ku hesho qoraalkaaga ama iimaylkaaga waxaa isticmaali kara hal qof oo keliya. Haddii dadka kale ay u baahdaan inay ku soo biiraan booqashada, u sheeg dhakhtarka marka booqashadu bilaabato ama ku casuun kahor booqashada.


1. Booqo bogga faahfaahinta ballanta si aad u booqato muuqaalka.
2. Geli taariikhda dhalashada bukaanka oo guji "Xaqiiji"



3. Guji "Ku casuun marti cusub (Invite a new guest)".



4. Dooro mid kamid ah lambarada aad la xariirto haddii ay horey barta ugu jireen.



5. Guji "Ku martiqaad marti cusub (Invite a new guest)" oo geli macluumaadkooda si aad ugu martiqaado qof aan liiska ku jirin: "Tijaabi qalabka" si aad u tijaabiso makarafoonkaaga, kaamiradaada, sameecadaha, iyo khadka.

- o Magaca koowaad
- o Magaca Dambe
- o Xiriirka kala dhaxeeya bukaanka
- o Lambarka taleefanka ama ciwaanka iimaylka si aad u dirto casuumaada

Guests

Invite a guest to join this video visit, such as a family member or caregiver. Guests can join the video visit with the link in their invitation message. Guests may have been invited by your provider.

Select someone to invite:

Joe Smith Jane Doe + invite a new guest

* Indicates a required field.

* First name

* Last name

* Relationship

Text message Email

* Phone number

This person has agreed to receive a text message.

Send text message invitation Cancel

Text messages related to your relationship with Children's Mercy, including updates related to your visits, Children's Mercy MyChart account, one-time passcode, billing notifications, prescription reminders, and care management will be sent to phone number above. Message and data rates may apply. Message frequency may vary. For help text HELP and text STOP to opt out of notifications from a specific short code. Please review terms and conditions and privacy policy below.

[Terms and Conditions](#) [Privacy Policy](#)


6. Guji "Dir fariin qoraal ah (Send text message)" ama "Dir casuumaad iimayl ah (Send email invitation)".

7. Martidu wuxuu heli doonaa ogeysiis leh lifaaq si uu ugu soo biiro booqashada.


Ku xir booqashadaada muuqaalka ah

sw15 daqiiqo ka hor booqashadaada muuqaalka ah, dhagsii lifaaqa booqashada ee ku jira ogeysiiska iimaylka ama qoraalka, ama akoonka MyChart ee bukaanka.

- Ha la wadaagin lifaaqa dadka kale. 1 qof oo keliya ayaa isticmaali kara lifaaqaan.
- Haddii dadka kale ay u baahdaan inay ku soo biiraan booqashada, u sheeg dhakhtarka marka booqashadu bilaabato ama ku casuun dadka kale ka hor booqashada.




1. Tijaabi makarafoonkaaga, kaaamiradaada, samecadaha, iyo khadka.



- U ogolow kaamiradaada iyo makarafoonkaaga in la isticmaalo haddii lagu weydiyo.
- Isticmaal meenuga hoos loo dejiyo si aad u badesho kaamiradaada ama makarafoonkaaga haddii loo baahdo.
- Calaamadaha cagaaran waxay muujiyaan in qayb kamid ah tijaabada shaqeysay. 
- Daar Qoraalka hoos Kasoo muuqda haddii aad rabto.  
- Badel magacaaga muuqanaya haddii aad rabto. 

2. Waxaa lagu gelinayaa qolka sugitaanka ee onlaynka ah. Dhakhtarka ayaa ku soo biiri doona booqashada ka dib marka uu dib u eego macluumaadkaaga.



3. Haka bixin hana saarin shaashada booqashada muuqaalka ah ilaa booqashadaada dhamaaneyso.

Hadda booqashada waa ay bilaabatay:


- Badhamada lagu maamulo muuqaalka waxay ku yaalaan geeska sare ee midig ee booqashada muuqaalka ah.



- **Awooda Khadka:** 
 - Tani waxay muujinaysaa xooga khadka internetka. Waxaad u baahan tahay khad xooggan si aad u dhammaystirto booqashada muuqaalka ama booqashadaada waxaa laga yaabaa in loo baahdo in dib loo dhigo ballanta.

- **Dookhyo dheeraad ah:** 

- **"Aaladuhu"** waxay kuu oggolaanayaan inaad badesho kaamiro, makrafoon, ama sameecad
- **"Muuqaalka gadaal ka muuqda"** waa meesha aad shooaca ku furi karto ee gadaale.
- **"Habka Shaashada ee buuxa"** oo "U badel halka toosan" waxay badelaan habka muuqaalka.
- **"Luuqad"** waxay leeyihiin dookhyo aad ku badeli karto luuqada qoraalka ee booqashada muuqaalka ah.
- **"Muuji qoraalada Ingiriiska"** fur qoraalada Ingiriiska ee booqashada muuqaalka.



- **Ka qaybgalayaasha:** 

- Fiiri cidda ku jirta booqashada muuqaalka.

- **Kaamirad iyo makarafoon:** 


- Hubi in kameeradaada iyo mikirifoonkaagu ay daaran yihiin. Guji batoonka si aad u daarto ama u damiso.

- **Wadaagista shaashada:** 

- La wadaag waxa shaashaddaada ka muuqda dhakhtarkaaga. Tani waxaa loo isticmaali karaa in lagu muujiyo sawir la seyf gareeyay. Dhakhtarku wuxuu awoodi doonaa inuu arko wax kasta oo shaashaddaada ka muuqda haddii aad la wadaagto.

- **Wada sheekeysiga:** 

- Waxaad farriin u diri kartaa dhakhtarkaaga inta lagu jiro booqashada.
- Guji badhanka Wada sheekeysiga si aad u furto wada sheekeysiga. Qor farriintaada oo guji "Dir (Send)".
- Wada sheekeysiga ma la arki karo marka booqashadu dhammaato.



- **Ka bax Wicitaanka:** 

- Guji "Ka bax wicitaanka (Leave call)" si aad u joojiso booqashada muuqaalka.
- Haddii aad u baahan tahay inaad dib ugu laabato booqashada ka dib marka aad joojiso wicitaanka, guji lifaaqa lagu soo diray iimaylkaaga ama qoraalka oo mar kale ku soo biir booqashada.


Caqabadaha Joogtada ah iyo Xalalka

- **Waxaan qabaa dhibaatooyinka kaamirada ama makarafoonka.**
 - Hubi in baroowsarkaaga internetka loo oggol yahay inuu galo makarafoonkaaga iyo kamaradaada.
- **Isticmaalka kumbuyuutarka:**
 - Sitinka oggolaanshaha Google Chrome:

1. Marka aad ku jirto bogga booqashada muuqaalka, guji badhanka rukhsadaha ama kaamirada ee dhinaca bidix ee qaybta wax lagu raadiyo.



2. Hubi in badhanka la shido inuu daaran yahay oo ay furan tahay kaamirada, makrafoonka, iyo codka.




- Dejinnada oggolaanshaha Microsoft Edge:

1. Marka aad ku jirto bogga booqashada muuqaalka, guji badhanka qufulka ee dhinaca bidix ee qaybta wax laga raadiyo.



2. Hubi in badhanka la shido inuu daaran yahay oo ay furan tahay kaamirada, makrafoonka.



• **Isticmaalida iPhone:**


- Hubi inaad isticmaasho baroowsarka interneetka ee Safari haddii aad isticmaaleyso iPhone.

1. Fur dejinnada. 



2. Hoos u dhaadhac qaybta Aaababka.


3. Guji aabka baroowsarka interneetka ee aad isticmaasho.



4. Guji Kaamirada.




5. Hubi in oggolaanshaha loo dejiyay Waydiinta Su'aal ama Oggolaansho.



6. Gadaal u laabo oo Guji Makarafoonka.




7. Hubi in oggolaanshaha loo dejiyay Waydiinta Su'aal ama Oggolaansho.



• **Isticmaalida taleefanka Android:**


- Xaqiiji inaad isticmaasho baroowsarka internetka Chrome haddii aad isticmaalayso taleefan Android ah.

1. Fur dejinnada. 




2. Hoos u dhaadhac oo guji Aababka si aad u furto sitinada aabka.


3. Hel oo guji aabka baroowsarka internetka ee aad isticmaasho.





4. Guji Ogolaanshaha.



5. Meenugaan wuxuu ku tusinayaa waxa la oggolaaday iyo waxa la diiday.



- Haddii makarafoonka ama kaamiradu ku jirto qabta **la Diiday**, Guji si aad wax uga badesho sitinada.
- Badel sitinka si aad u oggolaato in kaamiradda iyo makarafoonka la isticmaalo.



Sida

Loogu biiro Booqashadaada Muuqaalka adoo jooga Guriga



Ma heli karo lifaaqa i geynaya booqashadayda

- **Lifaaqa waxaa loo soo dirayaa iimaylkaaga iyo taleefankaaga dhowr jeer ka hor booqashadaada.**
 - Waqtiga jadwalka.
 - 7 maalmood ka hor.
 - 24 saacadood ka hor.
 - 1 saac ka hor.
 - 15 daqiiqo ka hor cuntada.
- **Ha la wadaagin lifaaqan dadka kale. 1 qof oo keliya ayaa isticmaali kara lifaaqan. Haddii dadka kale ay u baahdaan inay ku soo biiraan booqashada, u sheeg dhakhtarka marka booqashadu bilaabato oo u dir martiqaadka bogga faahfaahinta booqashada.**
- **Xaqiiji inaad hubiso faylalka iimaylkaaga ee kujira Junk ama Spam.**

**Wixii taageero ah ee ku saabsan booqashadaada muuqaalka ah,
wac (816) 234-3000 oo dooro ikhtiyaarka 5.**

Si aad ballan kale u qabsato, wac (816) 234-3700